

Advice for people with water tanks living in bushfire-affected areas

Talada dadka leh haanta biyaha oo degan meelaha dabku kaymuhuwaxyeellay

Somali

Hor u dhac

Dabku wuxuu keenaa khatar aad u badan oo ah qaac iyo dambas. Haddii aad ku nooshay meel dab waxyeellay waa inaad ogaataa inay dhici karto inay haanta galeen xasharaad, xayawaan ama iyo in dambas ka yimid dusha sarre uu galay haanta biyaha xareeda ah markuu roobku da'ay.

Ka sokow inay yihiin wax ku dhibaya, dambaska iyo haraadigu waxay noqon karaan kuwa ay ku jiraan kiimiko haddii ay galaan meeshaad biyaha ka hesho. Dabcan, xayawaan kasta oo dhintay waa sumaynayaa biyaha wuxuuna ka dhigaya kuwa aan ku haboonayn in la cabo.

Jiritaanka haraadiga iyo dambaska dusha sare wuxuu muujinayaa in biyaha ugu horreeyaa aanay ku haboonayn cabitaan. Haddii aad biyo ku furayso guriga dushiisa taas oo qayb ka ah qorshaha dabka, ama haddii uu horayba u da'ay, sunataani waxaa laga yaabaa inay horayba u gashay haanta biyaha.

Meelaha biyaha qabta

Xaallada kuwan la mid ah ayaa khuseeya biya qabadka soo socda. Haraadigu waxay gelayaan biya-mareenada yaryar. Sidaas darteed biya-mareenadaas yaryar kuma haboona cabida. Biyaha aan la dawayn looma isticmaali doono cabid sinaba. Biyaha ka yimaada go'dadka ama ceelasha weli way ku haboon yihiin cabitaan iyo isticmaalida aadamiga.

Biyaha aan ku haboonayn cabida waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo ujeedooyin kale sida dab damis ama waraabinta jardiinada laakiin ha cabsiin xayawaanka.

Maxaan ku samayn karaa haamaha xareeda si aan u yareeyo sumawga dabka?

Ku rakib aallad leexisa biyaha u horreeya iyo haraadiga kale ee sumaynaya biyaha. Kuwaan waxaa laga hellaa dukaamada lagu eebiyo agabka iyo kuwa iibiya haamaha xareeda.

Sidee ku ogaanayaa in biyaha haamuhu sumoobeen dabka ka dib?

Tusaha ugu fiicani waa aqoonta aad kula saari karto isbedelka ku dhacay biyaha iyo dhanankooda.

- Haddii dhananka biyaha ama urku isbedelo, ama calaw yahay, leeyahay midab aan caadi ahayn ama walxa ku jiraan, u qaado inuu sumoobey. Ha u isticmaalin cabid, ha ku diyaarin cunto, ayskareem, ilaa haanta la nadiifiyo lagana buuxiyo xareed ama la keeno biyo nadiifa oo uu keenay gaariga biyaha keenaa.

- Haddaad shaki ka qabto, u qaado in biyuhu sumaysan yihiin.
- Waxaa laga yaabaa inaad doorato in haanta biyaha aad ka eegto (kiimiko, iyo heerarka algiga iyo noolaha aan la arkina) ka hor inta aadan go'aan ka gaarin cabidooda.
- Biyaha aan ku haboonayn cabida waxaa laga yaabaa in weli loo isticmaalo waxyaalla kale, sida dab damiska ama waraabinta beerta, laakiin ha siin xaywaanka.

Goorma ayaan bilaabayaa isticmaalida xareeda mar kale si aan biyaha u cabo?

- Iyadoo aan ku xirnayn in haantu u baahan tahay nadiifin iyo in kale, weli waxaad u baahan tahay inaad nadiifiso dusha sare si aad uga hortagto haraaga gelaya haanta. Istimaal aallada leexisa biyaha ugu horreeya xareeda. Haddii aadan haysan leexiya biyaha ugu horeeya, ka goy biyaha kor ka imanaya ilaa laga nadiifiyo haraaga dusha sarre.
- Markay tahay amaan, ka nadiifi haraaga dusha kore iyo majaroorada inta aan roob di'in. Iska ilaali inaad is dhaawacdo.
- Shimbiraha dhintay ama xayawaanada yaryar waa in laga qaadaa iyadoo la isticmaalayo galoofis laguna ridaa baag balaastik ah si loo soo tuuro.
- Markaad nadiifinayso haanta, ka qaad dhooqo kana tirir/biya raaci gudaha adoo isticmaalaya daawada wax dhiqida oo biyo lagu qasay (sida waafaqsan awaamiirta ku qoran). Ha gelin haanta biyaha gudaheeda ilaa aad ka hubiso inaad haysato meel fiican oo hawo ka soo gasho, maadaama meel xirani si degdeg ah khatar u noqon karto.

Macluumaad intaas ka badan

- Qoraalka *Your Private Drinking Water Supply* wuxuu ku siinayaa macluumaad loogu talagalay inuu kaa caawimo inaad sii wado hellida biya amaana oo la cabi karo oo ccafimaad ah, kuwaas oo ay ku jiraan talo ku saabsan ku dawaynta kaloriin. Waxaa lagala sii bixi karaa: www.health.vic.gov.au/environment/water/tanks.htm
- Koobiyada qoraalkaan waxaa laga helli karaa Wasaarada Adeegyada Aadamiga Xafiisyadeeda qaybaha, Golayaasha, xarumaha jaalliyada iyo xarumaha ka caymashada dabka.

- Talada guud ee baabuurta biyaha qaada waxaa laga hellaa: www.health.vic.gov.au/foodsafety/issues.htm#water_carting_guidelines_
- Sheybaar tijaabin kara biyaha waxay ku hoos qoran yihiin 'Analysts' buugga tusaha telefoonka.
- Tala intaas ka badan oo shimbiraha dhinta ama xayawaanada kale, la xiriiir Qaybta Environmental Health Section ee Golaha Degmada
- Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan caafimaadka iyo tayada roobka dabka ka dib, la xiriiir unuga Environmental Health Unit, ee Wasaarada Adeegyada Aadamiga tel 1300 761 874.
- Xaashiyaha kale ee dabka iyo caafimaadka dadweynaha waxaa ka mid ah [hazards on your property after a bushfire](#)" iyo "Bushfire smoke and your health".

Labada xaashiyoodba waxaa lagala soo bixi karaa:

www.health.vic.gov.au/environment/emergency_mgmt/index.htm#bushfires

ama waa lagu soo dirayaa ka dib markaad wacdo Environmental Health Unit ee Wasaarada Adeega Aadamiga tel: 1300 761 874.

Waxaa daabacay Wasaarada Adeegyada Aadmiga,
Unuga Caafimaadka Bay'ada

Waxaa la soosaaray: Nufeembar 200